# Xuquuqdaada Baro: Xoriyadda Diinta

*Wax ka baro xaqa aad u leedahay in aad diintaada ku dhaqanto adiga oo ka badbaadaya heyb sooc diintaada ah.*

**Waxaan heyb sooc diinta ah aan kala kulmaa goobta shaqada**

X**uquuqdaada**:

- Qodobka VII ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ayaa loo shaqeeyaha ka mamnuucaya in shaqaalaha lagu sameeyo heyb soo ku dhisan diintooda. Waxaa jirta in sharciyada gobolka iyo kuwa degaankuba loo shaqeeyaha ka hor istaagayaan heyb sooca diinta.  Haddii aad u shaqeyso hay'adaha degmada, gobolka ama dhexe, waxaa jira sharciyo dheeraad ah.
- Haddii ay goobta shaqada u hogaansameyso sharciyada  joojinaya heyb sooca, waxa aad xaq u leedahay in aan laguu geysan heyb sooc ku saleysan diintaada.
- Haddii aad weydiisato, goobta shaqadu waa in ay shaqaalaha u fududeysaa si macquul ah sidii ay diintooda u gudan lahaayeen.  Fududeynta macquulka ah  ma aha mid shaqaaluhu u keeneysa dhibaato marka ay diintooda gudanayaan (sida khatar gelineysa naftooda oo kale ama lacag dheeraad ah ay ku bixiyaan).

**Maxaad sameyneysaa hadii xuquuqdaada lagu xad gudbo**

- Waxa aad cabasho u soo gudbin kartaa U.S. Equal Employment Opportunity Commission. Waxaa sidoo kale aad cabasho u gudbin kartaa hay'adaha gobolka iyo kuwa degaanka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**Goobo kale oo dheeraad ah**

**Waxaa heyb sooc diinta ah aan kala kulmaa guryaha**

**Xuquuqdaada:**

- Sharciga Helitaanka iyo Qeybinta Guryaha ee dadka u siman yahay waxa uu ka mamnuucayaa kireeyayaasha, kuwa guryaha gada, iyo kuwa maalgeliya guryaha  heyb sooca diinta marka laga reebo xaalado gaar ah (sida guryaha yaryar ee dadkii lahaa degan yihiin). Waxa kale oo sharcigu mamnuucayaa erayo iyo shuruudo heyb sooc ku dhisan oo lagu xiro kireynta ama iibka guryaha. Sharciyada gobolka iyo kuwa degaanka ayaa iyaguna leh sharciyo dheeraad ah.
- Laguuma diidi karo in guri lagaa kireeyo ama aad iibsato diintaada darteed ama lagugu xiro shuruudo kaas hor istaagaya.
- Lacagta kirada ama iibka laguguma kordhin karo, ama deynta diintaada darteed.
- Dersikaagu kuuma geysan karo qashqashaad, cabsi gelin iyo handadaad diintaada darteed.

**Maxaad sameyneysaa hadii xuquuqdaas lagu xad gudbo**

- Waxa aad cabasho barta internetka ah ka diiwaan gelin kartaa Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka. Waxaa sidoo kale aad cabasho u gudbin kartaa hay'adaha gobolka iyo kuwa degaanka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**Waxaa heyb sooc diinta ah aan kala kulmaa maamulka waxbarashada**

**Xuquuqdaada:**

- Maamulka  dugsigu kuma heyb sooci karaan diinta aad aaminsan tahay.
- Maamulka dugsiyadu kuuma diidi karaan fursadaha iyo waxyaabaha ardada loo qabto heyb sooc diintaada ku saleysan darteed.
- Maamulka dugsiyada waxa uu sharcigu waajib kaga dhigayaa in aysan la imaan qashqashaad ku saleysan heyb sooc diinta ah.
- Xaq waxa aad u leedahay in aad ku dhaqmi karto waxyaabaha diintaadu ku fareyso. Tusaale ahaan, waxa aad u tukan kartaa qof iyo koox ahaan oo aad kala hadli kartaa ardayda fasalka kula dhigata waxyaabaha la xiriira diinta xiliyada qadada iyo nasashada, adiga oo aan buuq ka dhigin. Waxa aad diintaada kaga hadli kartaa  leyliga fasalka ee laguu diro haddii uu la xiriiro diinta. Waxa aad fasalka u qeybin kartaa waxyaabo ka hadlaya diinta, taasoo sidii tii hore oo kale lagaa doonayo in ay buuq iyo saxmad ku abuurin fasalka.
- Maamulka dugsiyada waxaa waajib ku ah in ay ogolaadaan in ardaydu xiran karaan dharka diintooda munaasibka ku ah ama madaxa saaran karaan sida koofiyada yuhuuda ama xijaab, taasoo ku xiran xaaladda mid kasta.
- Maamulka dugsiyada waxaa waajib ku ah in ay ardayga aan maqnaasho loo qorin ciidaha diimaha.
- Maamulka dugsiyadu kuma beegi karaan xafladaha iyo barnaamijyada dugsiyada xiliyada salaadda ama xafladaha diimaha.
- Maamulka dugsiyadu kuma faafin karaan, bari karaan ama u dhigi karaan ardayda waxyaabo la xiriira diinta ama fariimo xambaarsan diin.

**Maxaad sameyneysaa hadii xuquuqdaas lagu xad gudbo**

- Waxa aad  cabasho ka diiwaan gelin kartaa Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka Xafiiska Xuquuqda Madaniga  ama Xafiiska Madaniga ee Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka adiga oo isticmaalaya  Foomka cabashada ee internetka ee OCR. Waxaa sidoo kale aad cabasho u gudbin kartaa hay'adaha gobolka iyo kuwa degaanka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**Waxaa heyb sooc diinta ah aan kala kulmaa goobta ganacsiga**

**Xuquuqdaada:**

- Sida uu dhigayo II ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah, goobaha qaarkood, sida maqaayadaha, hoteelada, shineemooyinka, garoomada ciyaaraha, iyo goobaha kale ee lagu madadaasho ayaa

lagu magacaabaa "fududeynta dadweynaha." Fududeynta loo sameeyo dadweynaha looguma diidi karo macaamiisha diintooda darteed.  Waxa aad xaq u leedahay in aad si buuxda u isticmaasho oo aad ku raaxeysato iyada oo aan loo eegin diintaada.   Qaar ka mid ah sharciyada gobolka iyo kuwa degaanka ayaa laga yaabaa in ay mamnuuc ka dhigaan heyb sooca diinta ee goobaha ganacsiga.

- Fududeynta dadweynaha looguma diidi karo qofka xijaabka, koofida yuhuudda, duubka iyo waxyaabaha kale ee diintiisa muujinaya oo uu xiran yahay darteed.

**Maxaad sameyneysaa hadii xuquuqdaas lagu xad gudbo**

- Waxa aad  cabasho u soo gudbin kartaa  Xafiiska Dhaqan Gelinta Sharciyada Madaniga ee Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka. Waxaa sidoo kale aad cabasho u gudbin kartaa hay'adaha gobolka iyo kuwa degaanka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**<u>Waxa aan dareen ka qabaa heyb sooc garoonka diyaaradaha ama xuduuda</u>**

**Xuquuqdaada:**

- Saraakiisha Ilaalada Xuduudaha (CBP) waxa ay si joogta ah u joojiyaan, xiraan ama baaritaan ku sameeyaan alaabada dadka, oo ay ka mid yihiin kombiyuutarada ama telefoonka gacanta, xuduudda—xitaa haddii aysan jirin wax laga shakiyo qof ahaan iyo cafashkooda.  CBP waxa ay awood u leeyihiin in ay ku weydiiyaan sharcigaaga marka aad soo galeyso ama ka baxeyso waddanka.
- Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka oo aad wadato baasaboor sax ah, waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha, inkasta oo diidmada ka jawaabista su'aalaha la xiriira ujeedada safarkaaga keeni karto dib u dhac iyo baaritaan dheeraad ah. Haddii aad heysato sharci deganaasho rasmi ah, waxaanu kugula talineynaa in aad ka jawaabto su'aalaha saraakiisha.  Haddii aad heysato dal ku gal, waa laguu diidi karaa in aad waddanka gasho haddii aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha saraakiisha. Hase yeeshee, Saraakiishu kuguma sameyn karaan baaritaan iyaga oo kugu soo xushay dintaada, qowmiyadda aad ka soo jeedo, asalkaaga, jinsigaaga iyo waxyaabaha aad siyaasad ahaan aaminsan tahay.
- Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka oo su'aalaha saraakiishu noqdaan kuwo faragelin ah, waxa aad xaq u leedahay in aad weydiisato qareen ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha. Haddii aad heysato sharciga deganaashaha rasmiga ah, waxa aad xaq u leedahay in aad qareen la hadasho taasoo ku xiran xaaladda.  Haddii aad heysato dal ku gal, waxa aad codsan kartaa in aad qareen la hadasho, laakiin sida caadiga ah xaq uma lihid in aad qareen la tashato ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha saraakiisha. Haddii ay saraakiishu kuu sheegaan in aad xiran tahay, ama haddii ay kuu cadaato in ay kugu tuhmayaan faldambiyeed, waxa aad xaq u leedahay in aad qareen la tashato qareen ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha, iyada oo aan loo eegayn sharcigaaga.
- Waxa aad xaq u leedahay in aan lagu weydiin su'aalo heyb sooc salka ku haya ama diyaarad lagaaga reebin. Waxaa laga yaabaa in dulliyaha diyaaradda uu diido karo inuu qof rakaab ah diyaaradda raaco hadii ay jirto sababa la rumeysan karo, in rakaabkaasu khatar ku yahay

duulimaadka. Hase yeeshee, duuliyuhu ma weydiin karo ama uma diidi karo rakaabka diyaaradda iyadoo ku saleysan waxyaabo uu diinta rakaabka ka aaminsan yahay.

- Waxa aad  xaq u leedahay in aad xirato marada madaxa ee diintaadu ku fareyso sida yarmulke ama hijab, marka aad dhex mareyso baaritaanka gegida diyaaradaha, hadii aanay makiinadda qeylin oo shaqaalaha Maamulka Amaanka Gaadiidka (TSA) aysan codsan baaritaan dheeraad ah. Waxaa suurogal ah in ay gacanta geliyaan marada maxada kuugu xiran ee diintaadu ku fareyso ama lagaa codsado in aad furto. Waxa aad codsan kartaa in ay gacanta ku baaraan ama aad furto iyada oo qof kugu jinsi ah kula joogo oo lagu geeyo meel qarsoon.
- Haddii aadan dooneyn in saraakiisha TSA ay taabtaan marada madaxa kuugu xiran, waa in aad diidaa oo aad u sheegtaa in aad adigu fureyso marada madaxa kuugu xiran . Saraakiisha TSA dusha ayey kaa eegayaan marka aad fureyso marada madaxa kuugu xiran, ka dib marinayaan maro yar oo suuf ah lehna qoyaan kiimiko ah oo la geliyo makiinad loogu talo galay in lagu baaro.  Haddii aanu baaritaanka waxba sheegin, waa laguu ogolaanayaa inaad safarka sii wadato.

**Maxaan sameyneyaa hadii aan aaminsanahay in xuquuqdaas lagu xad gudbay**

- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**Goobta aan ku cibaadeysto ayaa lagu sameeyey heyb sooc**

- Sharciyada dawladda dhexe ayaa ka mamnuucaya Maamulka sharciyeynta xaafadaha in ay diimaha qaarkood ka soo dhaweystaan kuwa kale marka ay bixinayaan ogolaashaha, dayactirka iyo dhismayaasha goobaha cibaadada ee dhismayaasha diimaha lagu caabudo.
- Saarkiisha sharciyeynta xaafadaha ma soo dhaweysan karaan hay'adaha aan diiniga aheyn kuwa diinta (sida kuwa madaniga ah) marka ay bixiyaaan ogolaashaha isticmaalka dhulka.
- Sharciyada Dawladda dhexe waxa ay ilaalin gaar ah oo xaga sharciga ah siinayaan wax kasta oo ka hor istaagaya goobaha lagu cibaadeysto isticmaalka dhulka kuwaas awood u siinaya dhismaha, dayactirka, iyo maamulka dhismayaasha loo adeegsado cibaadada iyo diimaha. Xaaladahaas gaarka ah, maamulka qorsheynta xaafadaha waa inuu soo bandhigaa cadeyn muujineysa sida goobaha cibaadu ay khatar ugu yihiin (erayga sharciga ah, "ku khasbaya" ) oo aan loo ilaalin karin ilaalinta sharcigu siiyey goobaha cibaadada (sida, amaanka ama qodobada la xiriira degaanka).  Maamulka qorsheynta xaafadaha waa inuu soo bandhigaa in aysan jirin siyaabo kale oo aan loo maareyn karin ayna waajib ku tahay in ay diidaan codsiga goobaha diimaha.   Haddii aanay maamulka qorsheynta xaafaduhu soo bandhigi karin, waa in ay bixiyaan ogolaashaha dhismaha oo dhismaha la hirgeliyaa.

**Maxaan yeelayaa haddii aan arko waxyaabo muujinaya heyb sooc**

- Waxa aad soo gaarsiin kartaa heyb sooca goobaha cibaabada ee Mareykanka Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Wasaaradda Garsoorka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.

**Waxaa heyb sooc diinta ah aan kala kulmay xabsiga**

**Xuquuqdaada:**

- Sharciyada dawladda waxa si gaar ah u ilaaliyaan xuquuqda diimeed ee dadka ku jira xabsiyada. Haddii nidaamka, sharciyada ama xeerarka xabsiga ay qofka ka hoos istaagayaan inuu ku dhaqmo waxyaabaha diintiisu fareyso, waa in saraakiishu dawladdu soo bandhigaan in fulinta sharciyadaas ay muhim tahay (erayga sharciga ah, "ay khasab ku tahay") danaha dawladda (sida nabadgelyada maxaabiista iyo caafimaadkooda) mana jirto meel kale oo ay ka mari karaan. Haddii aanay maamulka xabsigu soo bandhigi karin, waa in loo fududeeyaa sidii maxaabiistu u gudan lahaayeen waxyaabaha diintoodu fareyso.
- Iyada oo hadba ku xiran xaaladda, saraakiisha xabsigu waxaa laga yaabaa in la weydiisto cunto munaasib ku ah diinta maxaabiista (sida xalaal ama kooshari ah), adeegga cibaadada, ama loo golaado wadaadada. Waxaa kale oo laga yaabaa in la weydiisto in ay ogolaadaan kutubada diinta, dharka loo xirto diinta, marada madaxa lagu daboolo, iyo waxyaabaha la isku qurxiyo ama la isku sharaxo ee diinta (sida garka oo la sii daayo ama timo dheer la xirto).
- Saraakiisha xabsigu kuma qasbi karaan maxaabiista diin gaar ah in ay ku cibaadeystaan. Laguma ciqaabi karo haddii uu qofku diido inuu ka qeyb qaato waxyaabaha la xiriira diinta ama xafladaha diimaha. Saraakiisha xabsiyadu ma kala jecleysan karaan diimaha, maxaabiista qaarkoodna ma soo dhaweysan karaan iyada oo ka soo dhaweysanaya kuwa kale.

**Maxaad sameyneysaa hadii xuquuqdaas lagu xad gudbo**

- Waxa aad cabasho u soo gudbin kartaa Xafiiska Dhaqan Gelinta Sharciyada Madaniga ee Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka.
- Waxa aad kala xiriiri kartaa xafiisyada ACLU ee gobolkaaga macluumaad dheeraad ah.